

Xaashida Xaqiiqada

Waa maxay Maalgelinta Bulsheed ee qofku iska go'aansan karo?

Qorshaha Maalgelinta Bulsheed (Social Fund) wuxuu bixiyaa deyn ka madax bannaan tabarrucaadyo iyo dulsaar si dadka dakhligoodu hooseeyo looga caawiyo qiimayowga ay ku adag tahay iney ka bixiyaan dakhliga joogtada ah.

- Dadka ku jira Taageerada Dakhliga (Income Support), Gunnada Shaqo doonka (Jobseekers Allowance) dakhliga ku saleysan ama kaydka Hawlgabka Gobolka (State Pensions) waxaa loo tixgelin karaa deeqda daryeelka mujtamaca.
- Dadka horey ugu jiray Taageerada Dakhligu ama Gunnada Shaqo Doonka dakhliga ku saleysan ilaa iyo labaaatan iyo lix toddobaad waxay codsan karaan deynta miisaaniyadeynta.
- Dadka aan haysan ilo dhaqaale oo ku filan si ay isaga bixiyaan baahiyada waqti dhow ee deg degta ah waxay codsan karaan deynta qalalaasaha.

Waa maxay doorka Adeegga Dib u eegidda Madaxa Bannaan (Independent Review Service)?

Adeegga Dib u eegidda Madax Bannaan (Independent Review Service (IRS)) waa urur madax bannaan oo saldhigiisu yahay Birmingham. Doorkiisu waa inuu sameeyo dib u eegidyo madax bannaan ee go'aannada Maalgelinta Bulsheed ee iskaa loo go'aansado. Kormeeraha Maalgeinta Bulsheed ee sameeya dib u eegiddu wuxuu sameyn doonaa go'aan iskii ah oo ku saleysan xaaladaha arrinka oo dhan.

Xaqiiqooyinka iyo qaababka

IRS-tu:

- Waxay beddeshaa ilaa kala badh go'aannada Maalgelinta Bulsheed ee aan dib u eegno.
- Waxay go'aan ka gaartaa arrimaha Maalgelinta Bulsheed ee joogtada ah muddo 12 maalmood gudahood ah.
- Waxay deynaha qalalaasaha ee deg degta wax uga qabataa muddo 24 saacadood gudahood ah ama ka yar.

Xaggee wax badan laga ogaan karaa

Daabacaadeheenna dhammaantood waa lacag la'aan. Waxaad minguursan kartaan daabacaadaha isla markaana ogaan kartaan wax badan oo ku saabsan Adeegga Dib u eegidda Madaxa Bannaan adinkoo booqanaya shabakaddeenna: www.irs-review.org.uk

Sideed ula xiriiresaa IRS-ta

Adigoo telefoon ugu dira **0121 606 2191**, adigoo faakis ugu dira **0121 606 2201**

Adigoo minicom-ka ugu dira **0121 606 2188**

Adigoo e-mail ugu dira aam@irs-review.org.uk

Qoraal ahaan Kooxda Hawsha (The Business Team)

ee **4th Floor, Centre City Podium, 5 Hill Street, Birmingham B5 4UB**